
NOQO QORAA



Xiriirka Qoraaga

Magaca Buugga: Noqo Qoraa

Qoraagga: Sayid Axmed Xaaji

Kala xiriir Qoraaga:

Fesbuug: Sayid Axmed Maxamuud adan

Email: Sayidaxmed4@gmail.com

Fesbuug page: Sayid Axmed Looxow

Tel: 0618390797/+251961648333

Lahaanshaha dhiganahan

Lahaanshiyaha dhiganahaan (**Noqo Qoraa**) waxaa leh qoraaga qortay oo usoo tacab beelay maskax iyo maal. Lama Sawiran karo, lama beddeli karo qeyb kamid ah ama gebi ahaan, iyada oo aan ogolaansha buuxa laga haysan qoraaga qortay dhiganahaan.

Hibeny

Akhriste: Buuggaan waxaan u hibeeyay, awoowgey Aadan Xuseen, Hooyadey Xabiibo Qaliif, Ayeydey Cabdiya Dugaw Nuur, Aabahey Xaji Maxamuud Aadan, Aderkey Ibrahim Adan, Walaalkey C/Qadir Muxumed Qasay, Walaalkey Suleymaan Muxumed Qasay, Ayeydey Calaseey, iyo Aderkey C/risaaq warsame.

Hadaba akhriste, Buuggan Noqo Qoraa, waa buug aad u muhiim ah, gaar ahaan dadka rabo in ay noqdaan qoraa heer caalami, hasa ahaatee, buuggaan wixii ajar iyo xasanaad kasoo baxo, waxaan hadiyad uga dhigay Dadka meeshaan ku qoran.

Akhriste: Hibaynta Buuggaan ma'aha mid ku imaaday Faa'ido la'aan, balse waa dadka wax badan ila garab taagnaa, haddaba waxey mudan yihiin in loo hibeeyo buuggaan, iyo wax ka badan, sidaa daraadeyd, waxaan ka codsanaa akhristayaasha in ay u duceeyaan dadkaan, sidoo kale, markay arkaan qormo cajab gelisa.

Tusmada Buugga

Hibeyn……3

Tusmada Buugga……4

Afeef……7

Mahadnaq……8

Horudhac……9

Waa maxay qoraal?……11

Waa kumaa qoraa?……13

Tiirarka qoraalka…… 15

Astaamaha qoraalka……17

Habraaca buug qorista……19

Yaa noqon kara qoraa?……21

Geedi socodka qoraal curinta……23

Adeegsiga xarfaha laban laabma……25

Maxaa looga baahanyahay qoraaga?……27

NOQO QORAA

Magac bixinta buugga……..29

Suuq geynta buugga……34

Hadalka iyo qoraal……36

Qeybaha buugta la qoro……..38

Isbaddalka qoraaga……40

Talooyin anfacayo qoraaga……,,……42

Caqabadaha qoraaga……,……50

Sida loo qoro sheeko gaaban……52

Shuruudha qoraaga……63

Maxaa wax loo qoraa?.....71

Sida loo qoro maqaal……73

Astaamaha qoraaga……77

Ku biiridda naadi……88

NOQO QORAA

Wax curinta waa imisa?.....81

Inta aad bug qoristiisa billaabin……..…….84

Eray bixinta afafka qalaad……..87

Dhammad……..……..89

Tixraac……..……..92

Afeef

Soomaalidu waa bulsho war ku nool ah, haddaba waxaan ka cudur daaranayaa haddiiba ay dhacdo sida la rabay aan asiibi waayo, Buuggaan oo muhiimadiisu tahay in dhalinyarta soo baxayso oo rabta in ay noqdaan qoraa heer caalami.

Hadaba waxaan si mug leh ugu qaadaa dhigay wax yaalaha ugu muhiimsan sida, tiirarka qoraalka, hab qorista buugga, suuq geynta buugga, magac bixinta buugga iwm.

Hagaag: Haddii la rabo in la noqdo qoraa waxey ku xiran tahay go'aanka aad qaadata mar walba, hadaba buuggaan, waxa uu diiradda saarayaa sida loo noqdo qoraa iyo hal-abuurka aad leedahay sida aad usoo bandhigan karto, sidaasi darteed, waxaan ka cudur daaranayaa gefafka hingaadda iyo qaladaadka fardsamada madbacadda, wax walbo oo xun waxey ka a haadeen naftayda iyo sheydhaanka, wixii wanaagsan waxey ka a haadeyn xagga Allah.

Ugu dambeyn, Wixii Hambalyo ah ama sixid u baahan oo aad aragto igala soo xiriir lambaradaan. 0619111357/0618390797.

Mahadnaq

Mahad oo idil Eebba ayey usugnaatay, oo ii suurta geliyey inaan Buugaan dhamaystiro, iina fudadeeyay dhibaatadii badneyd ee aan kalasoo maray.Nabad -galyo iyo naxariis Xabiibkeena suuban ee muxamed dushiisa ha ahaato.

Waxaan umahad celinayaa dhammaan inta kaqeyb qaadatay Buuggaan, fikraddiisa ,iyo soo saariddiisa , Aqoon ahaan,caqli iyo dhiiragalinba kageysatay, Sidoo kale waxaan umahad celinayaa inta kaqeyb qaadan doonto markuu soo baxo, waxaana idin leeyahay Hambalyo, Hambalyo, Hambalyo, Hambalyo,Waxaan mahad gaar ah u celinayaa:

1: **Qoraa Suldhaan Nayruus**: aduunyadaan cid walbo ooh al abuur la timaado Kama maaranto fikrado ama garab istaag.

2: **Qoraa C/salaam ceeryaamo**. Masoo koobi karo Mr **Ceeryaamo** amaantiisa.

3: Mr **Yuunis Cumar**, waa la taliyaha nolosha qoraaga.

Horudhac

Buuggaan magaciisu waa (Noqo Qoraa) Waxaanna ugu bixiyey magacaas, markii aan arkey dhallinyaro ka wal walsan arrimaha qorista buugga, iyo sida ay usoo bandhiggan lahaayeen hal abuurka ay leeyihiin, sidoo kale i waydiinaya sida looga guulaysto caqabadaha ku hareereysan dhanka buug qorista, maadaamaa aniga aan qibrad dheeri u leeyahay arrimahaas, intaas kadib waxaan hindisay magaca buuggaan,

Ugu dambeyn si ay u helaan dadka rabo in ay noqdaan qoraa, macluumaad ku saabsan buug qorista iyo wax yaabaha la xiriiro, akhriste: waxaan kuu rajeynayaa in aad ku guuleysan doonto buug qorista iwm, waa haddii aad akhrisata buuggaan, maxaa yeelay, buuggaan oo aad u yar aana lagu soo koobi Karin arrimaha ku saabsan buug qorista, balse, buuggaan waxaa ku jiro micno aad u weyn, aqoon ku dheehan waayo aragnimo runtii.

Waxaan aad u jeclaan lahaa qof walbo oo daneynayo buuggaan in uu ku akhriyo maskax deggan, si uu u fahmo nuxurka buugga kusaabsan……

Maaddaamaa buggaan uu yahay buug ka hadlayo habka casriga ee loo noqdo qoraa heer caalami.

Hagaag: Haddii aad rabto in aad ku noolaato nolol ku dheehan ixtiraam iyo sharfid waxaa lama huraan ah, inaad ku fikirto sida aad u noqon lahayd qoraa anfaca bulshadiisa iyo qoysiiska, sidoo kale, qoraagu waa qalin qaadaha wax ka qoro arimo farabadan sida:

Dhaqaalaha.

Fanka iyo suugaanta.

Siyaasadda.

Deegaanka.

Diinta.

Ciyaaraha iwm.

Waa maxay Qoraal?

Qoraal waa nidaam xarfo loo habeeyay, taas oo laga damacsan yahay in lagu gudbiyo farriin, aqoon iwm.

Sidoo kale, qoraalku waxaan ku qeexi karnaa waa tilmaan ka samaysan xarfo, kaasi oo kooxdii dad ahi isla garanayso.

Qoraalku waa hab loo is ticmaalaya calaamada, si uu ugu beddalo u jeedo.

Qoraalku waa nidaam loo qoro xarfo kala horeeyo, ayada oo looga dan leeyahay in lagu gudbiyo fariin, sidaas darteed, qoraalku waa aasaaska is gaarsiinta aadanaha.

Akhriste: Qoraalku waxaan ku tilmaami karnaa darreen, haddaba qoraalku waxaa loo beddali karaa hadal, qoraalkana hadal ayaa loo beddali karaa.

Hagaag: qoraalku wax yaalaha lagu qeexi karo waa farabadan yahay, balse, midka ku habboon ayaad ka qaadan kartaa akhriste.

F.G: Xarfaha farta soomaaliga waa 21 xarraf oo ka kooban shibane, shaqal dheer iyo shaqal gaab, Shibanaha:
B,T,J,X,KH,D,R,S,SH,DH,C,G,F,Q,K,L,M,N,W,H, iyo Y.

Shaqal dheer: AA, EE, II, OO, iyo UU.

Shaqal gaab: A, E, I, O, iyo U.

Akhriste: Wixii ka baxsan xarfahaas afsoomali ma'aha, sidoo kale, waxaan kula tallin lahaa dadka qoreyaasha in ay difaacaan afkooda hooyo, walliba ka fogeeyaan wax yaalaha qallaad ee bulshada lagu jahwareerinaayo, haddaba waxaa jiro dadka sheeganaya qoraa in ay yihiin, haddana ku ciyaaraya afsoomaaligii la qoray, laguna heshiiyay hab qoraalkiisa, waxaan u sheegi lahaay qoreyaashaas in ay ka daayaan wax yaalaha lagu soo kordhinaayo afka soomaaliga…

Waa kumaa Qoraa?

Qoraagu waa laf-dhabbarka bulshada, haddii la rabo bulsho in ay jirto waxaa muhiim ah, in la hello qoraa, qoraagu wuxuu ka turjumayaa jiritaanka luqaddiisa hooyo, akhriste waxaad ogaataa ummad walbo dunidaan ku nool, waxa ay leedahay qoraa, sidoo kale, hadii larabo in la baabi'iyo bulsho, waxaa laga soo galaa saddex dhinac, 1: diintooda, 2: dhaqan kooda, 3: luqaddooda.

Marka luuqadda ay bulsho leedahay , hadii la hor mariyo waxey ka dhigan tahay jiritaanka bulshada, haddaba akhriste, waa in aad diiradda saarto, qorista buugaagta, maxaa yeelay, marka aad wax qorto bulshada waad ka duwan tahay, xitaa goob walbo, waxaad la kul meysaa dad ku jecel, tusaalle, marka aad ilmo dhasho, waxaa la leeyahay, waa wareey ka leexda waa ilmihii qoraaga!, haddaba akhriste, haddii saas laguu wanaajinaayo waa in aad noqotaa qoraa, faafiya luqaddiisa hooyo, noqo mid kusoo kor- dhiyo bulshadiisa buugaag wax tar leh sida.

Buugaagta kobciya maskaxda aadanaha.

Buugaagta dhiira gellinta nolosha.

Buugaagta ku cibra qaadashada caqabadaha nolosha.

Hagaag, Qoraagu waxa uu kamid yahay dadka la qiimeeya dunida, waxeyna ka dhigan yihiin jiritaanka bulshada, sidoo kale, waxaa muhiim ah in la qiimeeyo qof walbo oo hal abuur la yimaado,laakiin, haddii aan soomaali nahay ma qiimayna qofka hal abuurka leh sida farsamo yaqaanada, waxaan ugu yeernaa boon boon dhalay, laakiin, dunida waxaa looga yeeraa **injineer.**

F.G: Qoraagu waa laf dhabarka bulshada, haddaba qiimeey.

Tiirarka Qoraalka

Qoraalku wuxuu leeyahy tiirar aad u weyn, kuwaas oo aan suurta galaynin la'aantood, haddaba, waa saddex tiir.

1: Marka la rabo in wax la qoro waxaa laga maarmaan ah **Ogaansho**, sababtoo ah, qofka marka uu wax ka qoraayo waa in uu wax ka fahansan yahay, kana faalloonkara.

2: Baarris, baaristu waa waxa keliya ka dhabbayn Karo in aad wax qorta, waayo, baaris la'aan waxey caqabad ku noqonaysaa qoraaga.

3: Falaqeyn, wax walbo la baaro waa in la keenaa natiijadooda saxda ah, maxaa yeelay, fallaqeyntu waxey kaallin muhiim ah, ka ciyaartaa in la hello xog la isku hallayn karo.

Akhriste: Sidoo kale, tiirarka qoraalka waxaan dhihi karnaa naxwaha Afka Soomaliga, waayo, wax walbo

Waxey leeyihiin naxwo, haddaba, haddii aad rabto in aad noqoto qoraa, waa in aad barataa naxwaha.

Tiirarku waa udub-dhaxaadka qoraalka ama suubnaanta qoraalka, hasayeeshee, guri walbo wuxuu leeyahay aas'aas, kaas oo suura gelinaayo in la dhiso guriga, haddaba, waxaana la huraynin in la fahmo naxwaha qoraalka.

Haddii aan wax yar oo faa'ido ah ku darro, bal aan jalleecna taariikhda afsoomaaliga.

Ku dhaqanka farta soomaaliga waxa uu ahaa sannadda 1972, balse, inkastoo ay jireen luqado lagu hadli jiray inta aan la qorin farta soomaliga, sida Luuqadda carabiga, Ingiriiska, Talyaaniga iyo qoraalo kale ay isku dayeen aqoonyahanno soomaaliyeed, laakiin, aan wada hergelin, sida fartii cusmaaniyadda.

F.G: SannadaGudiga loo xilsaaray farta soomaaliga waxey ahayd 1961.

Astaamaha Qoraalka

Astaamaha qoraalka waxey kamid yihiin wax yaalaha lagu fahmo qoraalka isla socdo iyo kuwa aan isla socon, haddaba sida aan ognahay dhiggaal ama qormo walbo waxey u baahan tahay haggaajin ama qurxin, haggaag, astaamaha waxaa kamid ah.

1: Calaamad su'aalka (?) bilaha oo la furo.

2: joogsiga (.)

3: Xigasho (‘’ ‘’) xigashadu waxaa loo adeegsadaa qoraal laga soo xigtay qof kale.

4: Caalamad la yaab (!) tusaalle, yaah!

5: Dhibic iyo hakad (.,)

6: Diilin (/)

Akhriste: astaamaha ku qoran weedha dhexdeeda.

1: Astaan hakad (,)

2: dhibic hakad (.)

3: Labo dhibcood (:)

4: Jiitin dheer (--)

F.G: Xaraf walbo oo ugu horeeyo qormadaada waa la weyneeyaa wuxuu rabo ha noqdo, sidoo kale, hadal hadduu dhammaado ha kusii dabaqabanin hadal kale, balse ku bilaw sadar cusub.

Habraaca buug qorista

Habraaca buug qorista waa mid ku dhisan sharci, waxaana laga maar maan ah in buugga aad qorayso ku billawdaa gogoldhig soo jiidan karo akhristaha, soona koobaya murtida qoraalka.

Sidoo kale, ku xiji tusmo, tusmaduna waa in ay ka koobnaato tuducyo, midba mid kuu dhiibaayo, tuduc kastana ha ka koobnaato hal fikrad oo aad ku xoojinayso weedh murtiyeeddaadii.

Ugu dambayn: ku gabagabeey buugga gunaanad, gunaanadkaas waa in uu soo aruurinaaya wax yaalihii aad soo xustay, sidoo kale, ku sagooti oraah cajiib ah.

Hadaba, waxaad ogaatay habraaca buug qorista oo ka kooban saddexdaas shey iyo wax yaalaha hoos imaanay, intaas kadib buugga aad qortay ku noqo, waliba adigoo fiirinaya naqshadda aad isticmaashay, tixidda, luuqadda iwm.

Hagaag: tusaalle, waxaan rabaa in aan ku tusa ayadoo farsamo qoraal ah, haddaba, marka aad buug billaabaysa ku billaw gogoldhig, intaas kadib gogoldhigga waxaa hoos imaanaya noocyada waxa aad ka hadlayso, oo tusaalle ahaan, hadii **xoola** aad buug ka qorayso waa in aad sheegtaa inta ay yihiin xoolahaas, sida kuwa abaarta u adkaysta:

1: Geella

2: Riyaha.

Kuwa aan abaarta u nugul waxa weeya 1: lo'da iyo idaha

Akhriste: intaas kadib sidaas ku wad buugga, insha Allah, waxaad noqon doontaa qoraa guulaystay.

Yaa noqon kara Qoraa?

Qoraa in la noqdo waa mid iska fudud balse, keliya waxey u baahan tahay in aad noqoto qof ku fikiraayo in uu la yimaado hal abuur, haggaag, qoraa waxaa noqon Karo qofkii laga hela dhowrkaan tilmaan.

1: Noqo akhriste wanaagsan, akhrisku wuxuu kugu dhalliyaa in aad la timaado hal -abuur ka duwan midka aad akhrisay, haddaba waa in aad qorsheysaa bishii buugaag farabadan, sidoo kale, waxaana hubbaal ah, in aad noqonayso qoraa ku xeel dheer qoraalka, waxaanna lagu maah maahaa, akhristaha maanta waa qoraaga bari.

2: waa in aad samayn karto hal abuur cusub, sababtoo ah, qof aan la hayn hal abuur ma noqdo qoraa.

3: waa in aad marka hore isku daydaa wax qorista, tusaalle, wax qoristu waxaad kasoo billawdaa baraha bulshada ay ku xiriirto iwm, haddaba haddii loo riyaaqa qoraalkaada waxaad tahay hal abuure aan taariikhda xusin, bal isku day buug qoris.

4: marka hore sameey sheekooyin yaryar, maxaa yeelay, waxey hordhac u noqonayaan in aad qorto buug lalla yaabo, haddaba akhriste, qoreyaasha guulaysta waa kuwa kasoo billaaba sheekooyinka yaryar.

5: La saaxiib qoreyaal, waayo, waxaad baranaysaa qoreyaal kala jaad ah.

6: Qoraa waxaa noqon Karo midka iska indhatira dhibaatooyinka soo wajahaayo sida, in aad waaydo qarashka buugga, qoyskaada oo kuu fahmo dhibaato, iyo qabyaaladda, sidoo kale, in aad waydo wax kuugu dhiirra geliya ama kuula qabtobuug qorista iwm.

F.G: majiro qof ku dhasha qoraanimada, balse waa wax la barto ee fadhiga ka kac.

Geedi socodka qoraal curinta

Geedi socodka qoraal currinta waxaa kamid ah.

1: waa in aad baadi goobtaa mawduuc xiiso leh.
2: Xog farabadan waa in aad ka haysataa mawduuca aad qorayso.

3: isku jaan goyn dhismaha qoraalka.

4: Buug qoristu marka aad dhammayso, ku llaabo buugga.

5: Tifaftir ayuu u baahan yahay buugga aad qorayso, sidoo kale, mawduuca aad ka hadlayso iyo qofka tifaftirka waa in uu aqoon u leeyahay mawduuca buugga.

6: Qoritaanka buugga marka aad dhammayso, isku day in aad kor u akhriso waxa ku qoran buugga.

7: Qoraaga waa in uu isticmaalaa jumlooyinka isku dhafka.

8: Waa in aad haysataa agabyadii loo baahnaay.

9: Waa in aad joogtaa goob aan buuq lahayn.

10: Marka aad wax qorayso, waa in aad ka doodaa, intaas kadib, wixii natiijo kuusoo baxo ku qor buugga.

11: Wax curintu ama in aad la timaaddo hal abuur, waxey ku xirran tahay hadba sidaad u fikirto, haddaba, waqtiga aad ku guda jirto qoritaanka, waxaa muhiim ah tixraac, waa haddii aad meel kazoo qaadatay.

12: Qorista buugga waa in uu maraa nidaamyada buugta caalamiga loo qoro.

13: Geedi socodka qoraal curinta marka aad dhammayso waxaad gabagabo uga dhigaysaa, hal ciwaan oo kulminaayo waxyaalaha buugga ku jiro.

Adeegsiga xarfaha laban laabma

Xarfaha laban laabmaya waa 7 xarraf, waxaanna lagu soo gaabiyaa (m, n, l, g, r, d, b)

Sidoo kale, xarafka laban laabmaya waa in uu adagyahay marka lagu dhawaaqayo.

Waxaa kaloo muhiim ah, xarfaha laban laabmaya waa in aysan udambeeyin kelmad ama eray uu ku jiro.

Waxaa kaloo lagu gartaa xarafka laban laabma, waa in uu san u dhaxeenin labo shaqal.

Hagaag: Tusaalle, erayada laban laabma inta ugu badan waa kuwaan iska fiiri.

1: Addoon.

2: Beddel.

3: Ballac.

4: Caaddil.

5: Hadda.

6: Dhammaan.

7: Carrab.

8: Eeddo.

9: Eebbe.

10: Hoggaamin.

F.G: Wixii laga hello 7 daas xarraf, laban laab, iska jir xikmad baa ku jirto.

Maxaa looga baahan yahay qoraaga?

Wax yaalaha laga rabo qoraaga waxaa kamid ah.

1: Waa in uu leeyahy jadwal akhris, taas oo u suura gelinnayso in uu noqdo qoraa heer caalami.

2: Waxa uu qoraayo waa in ay noqdaan wax bulshada faa'ido u leh.

3: Qoraaga waa in uu ku dhex milmin siyaasadaha is diidan.

4: Qoraaga waa in uu qallinkiisa ugu shaqeeyaa danaha wadanka.

5: Waa in uu ka qeyb qaataa wacyi gelinta bulshada.

6: Wixii qalad ah, sixid waa in uu ku beddalaa.

7: Qoraaaga waa in uu qoraa wax walbo oo fikrad ah kusoo dhaco.

8: Waa in uu yahay qoraaga mid la socdo waqtiga la joogo iyo in uu ku salleeyaa qoritaankiisa waxa loo baahanyahay.

9: Qoraaga waa in uu yaqaannaa naxwaha Af-Soomaaliga.

10: Buug walbo aad qorayso u yeel qodobo ama waxa lagu dhaha afka qalaad list.

11: Ha noqdo buugga aad qorayso mid ku dhex jiro sheeko bulshada soo jiidanayso.

F.G: Qoraaga waxyaalo farabadan ayaa loogga baahan yahay, balse inta ugu macquulsan ayaan idin sheegay, haddaba wixii ka dhimman ku darso adiga.

Magac bixinta Buugga

Magac bixinta buugga waxa uu kamid yahay wax-yaalaha aad loo daneeyo, haddaba akhriste, haddii aad rabto in buuggaada ay bulshado u riyaaqdo isku day in aad magac il qabad leh ubixiso, sidoo kale, isticmaal weeraha gaagaaban iyo qodobayn.

Hagaag: akhriste, isticmaal erayo xoog badan walliba xammaasad xambaarsan.

Sacabbo godan, calaacalo cadar leh, kakan haddana jilcan, cad cad, haddana mad madoow, leh ciddiyo jaran oo aan joofaqyo ahayn baa aan kugu salaamay.Waa anigaan dhoolla cadaynaya ee hortaada taagan.Ma ila yaabbantahay? Weli kuma soo hor istaagin. Dabcan haa! Waa runtay ee--Waa aad iga ajiibtay sow maahan?-- hagaag! Nabdaysi kuu geli maayo; ha yeeshee, u jeedkaygu waa in aan arrin muhiim ah kaala hadlo.

Qoraageennow? Qoraagaygoow? Kan maankiisa

iyo afkaarihiisa lagu meel maroow? Kan xaqqa iyo aan runta ka gambanoow? Geesiga bulshada u kacayoow? Buug qoristu waa kadeed, waa dhib iyo rafaad, waa wareer iyo feyl roor, kabaabyo iyo daal, kadankood iyo fadhi, kulayl iyo qaboow aan kala roonayn.

Sidaa oo ay tahay, bulshadu aad baa ay ugu baahantahay qoraalka iyo in loo soo gudbiyo cilmi iyo sheekooyin wacyigooga dhisa.Sidaa awgeed, noo soo gudbi dhacdooyinka, cilmiga, suugaanta iyo sheekooyinka aad heyso.Waxa aan dooneynaa in aan akhrisanno oo aan ku meel marno, mahadna kaaga dhigno.Intaa ka dib, kolkii aad buug qorto, faaf-reebto oo aad arrinkiisa dhinac iska marido, ka fikir magacii aad ula bixi lahayd. Waa wiil/gabadh curtay/curatay oo kale ee si fiican uga fiirso magaca aad ula baxayso--qalinlayda qaar baa magaca sii diyaarsada, ka hor inta aanay xogtoodaba kaamil yeelin, taasna waa lagu kala duwan yahay-- haddaba, aan kula wadaago dhowr siyaabood oo aad magac cajiib

-Waa inta aan ka aqaane--Sideedaba, saddex hab ayaa loo maraa magac bixinta buugga, hababkaas oo kala ah:

1) Waydiin? Tusaalle: Maxaa carruurtu u ooyaan? Maxaa jacaylku noogu dhacaa? Waa kuma ninkaygu? Waa tuma naagtaydu? Waa maxay wel wel? Hadmaan aroosi doonaa? Iwm.

2) La yaab! Tusaalle: Waa ay i soo eegaysay! Saa waxa ay tiri! Taan arkay! Dhibbanaha aan dhalan! Hayaay! Hayga jeesan! Iwm.

3) Magac caadi ah. Tusaalle: Maan-Faay, Adeegto, Ayaan-daran. Gobaad, Indha-Deeqa. Iwm. Saddexdaas qaab ayaa magacyada inta badan loo maraa magac u bixinta buugta. Waxa jira buugaag badan,

oo magaca ku qoran uu gudbiyo xogtii ay ahayd in buugga looga dhergo. Taasna waa laga fiican yahay.

Tusaalle fudud: KOBA TOLIHII TAAJIRKA NOQDAY! Dee xogtii la rabay in buugga looga bogto sowdigaa jaldiga kore ku sheegay. Akhristuhu xiiso badan uma qabo buugga waayo? In koba tolihii taajir noqday adaaba u sheegay; taa waxaa ka habboon, adoo yiraahda “WAAYIHIISII" " AYAAMIHIISII YAABKA LAHAA" HEBEL IYO KABO TOLE NIMO" iwm. Kuwaan dambe ayaa xiiso gelinaya akhristaha.

Gaba gabadii, walaal, magaca buuggaaga iyo xogta aad gudbinayso waa in ay is lahaadaan, ka dheeroow in qoraalkaagu rif rifnaado, sina isugu daadsanaado. Welligaa ka diktoonoow taas--waa haddii aad ku cusubtahay masraxa qoraalka--qaab qoraalka toolmoon waa moowduuc kale oo u baahan waqti badan, sidaa daraaddeed, halkaa u dhaafi maayo. Waa aan filayaa in buuggaagu uusan u ekaan doonin buugaagta kale, kelmad yarba Allaha ka dhigee.

Welligaa ahoow qoraa aan magacyada buugtiisu kuwo kale raad yar ku lahayn. Allaha ku garab galo walaal. Bulsho malaayiin ah ayaa u oomman xogaha, cilmiga, sheekooyinka iyo suugaanta aad heyso, welliba waa bulsho aad u baahan oo aan buugaagta horay loo qoray in yarna ka qooyn, u qor buugaag tayo leh oo lagu tanaado

Suuq geynta buugga

Akhriste: Buugga marka aad dhamayso qoritaankiisa waxaa muhiim ah in aad suuq geyn ku samayso, waayo, waxa aad u rafaadayso waa in uu hal abuurkaada bulshada gaaro, haddaba, waxaad samaynaysaa dhowr qodob waxaana kamid ah.

1: Xayeysiin qeyb kamid ah buuggaada, sababtoo ah, bulshada soomaaliyeed waxey aad u jacel yihiin buug loo sameeyey muuqaal xayeysiin ah.

2: Sidoo kale, ka sameey xayeysiin dhanka baraha bulshada.

3: Buugga aad qortay meelaha looga baahan yahay geey, tusaalle, aniga waxaan qoray buug lagu magacaabo Caawiyaha Caruusyada, waxaana u iib geeyay meelaha lagu qurxiyo haweenka, goobaha dalxiiska, meelaha laga gado shoobinada iwm, hagaag, marka buuggaada meesha looga baahan yahay geey walaal qaali.

4: La sameey xiriiro bulshada qeybaeeda.

5: Uyeel buuggaada halku dhig lagu xasuusto.

6: Sidoo kale, Samayso beej lagula soo xiriiro.

7: Ku xayeysiiy onlaynada.

8: Isku day in ay kaa gataan buuggaada qaraabadaada, walliba u sheeg, in aad tahay qoraa bannaanka ku dhacay, sidoo kale, la tasho dhallinyarada isku xaafadda aad thiin, maxaa yeelay, buugga marka aad soo saarto wuxuu u baahan yahay garab, waxaana marqaati u ah, sida ay bulshada isku xaqirayaan.

F.G: Bandhigga buuggaada haga soo qeyb gallaan qaraabadaada, walliba hakuu camiraan, waa iga talo, waayo, sida ay wax yihiin waa in aan idin sheego, sharaf haddaad rabto, kasoo muuqo qaraabadaada, haddii kale iska dhaaf, xikmad baa ku jirto.

Hadalka iyo qoraalka

Akhriska iyo qoraalka waxaa u dhaxeeya farqi aad u weyn, sababtoo ah, marka la hadlaayo way iska fudadyahay, balse marka wax la qoraayo waa in la adeegsadaa dhowr shey waxaana kamid ah.

1: Hadal koobid.

2: Xulasho erayo xul ah dumuc weyn leh.

3: Quruxda hadalka waa in aad ka dhigtaa mid soo jiidasho leh, sidoo kale, uu ku raaxaysanaayo akhristaha.

4: Isku day in aad qoraalkaada uu san noqon hadal suuqeyd, laakiin, waa in uu ahaadaa hadalo ku dheehan murti cajiib ah.

Akhriste: qoraalku wuxuu leeyahay hab-qoraal loo qoro, kaas oo dagsan, sidoo kale, waa xarfo la isku xiray oo isku beddalay (eray).

Hagaag: Ku hadalka afka Soomaaliga wuxuu leeyahay nidaam ama xeer balse, ku hadalka Soomaaliga haddii aad ku hadasha wax qalad ah, wax saas kuu sii tixraacayo malaha, sababtoo ah, Hadalku ma'aha wax laguu qoraayo balse qoritaanka buug wuxuu sii jirayaa qarniyo badan, haddaba akhriste, waxaad ogaataa in ay kala duwan yihiin ku hadalka afka Soomaaliga iyo qoritaankiisa.

Hadalka iyo qoraalka waxbadan ayey ku kala duwan yiin haday noqoto hadal koobista, adeegsiga erayo xoog badan iwm.

F.G: Qoraalku wuxuu macna yeeshaa marka la qoro.

Qeybaha Buugaagta la qoro

Akhriste: buugaagta la qoro waa labo qeybood keliya.

1: Buug ka hadlaayo sheeko.tusaalle, buugga gododle, waxa uu ka hadlayaa qisooyin cajiib ah, taas oo oo marba farxad iyo marna murugo ah, haddaba qoraa suldhaan nayruus, wuxuu ugu hadlay buuggaas qisooyin dhab ah oo saamayn ku leh bulshada soomaaliyeed, waanna buug aan aad uga helay sir iyo xog farobadan, taas oo ku fareysa in aad feejignaato.

2: Buug ka hadlaayo aqoon. Tusaalle, buugga taariikhda soomaaliya ka hadlaaya, waa buug ku dheehan aqoon, waayo, taariikhda lagama been sheegi karo, haddaba aqoonta ma'aha mid lasoo iqtiraacan karo, balse sheekadu waa mid la samayn karo, laguna cabbiri karo waqtiga la joogo.

Akhriste: Buugaagta la qoro waa labadaas nooc aan kor kusoo xusay,

sidoo kale, waxaanna muhiim ah in aad ka war heyso muhiimadda buugga uu u-

leeyahay bulshada, waayo, buug haddii la qoraayo waa in ay jirtaa baahi keentay in la qoro buug magac hebal wato, tusaalle, buugga **Noqo Qoraa,** waa buug ay iga codsadeen akhristayaasha, walliba in badan igu soo laabtay, sidaas daraadey, waxaa ii suurta galay in aan qoro buuggaas, haddaba buugga aad qorayso ha noqdo mid ay bulshadu u baahan tahay.

Hagaag: Buugga aad qorto wuxuu micno yeelanayaa marka aad waxbadan akhriso iyo aad daraaseyso waxa aad jeceshahay, maxaa yeelay, waxaa in badan dhacda, waxaad arkaysaa qof wax ka qoraayo wax uusan aqoon u lahayn ama fikir aan ka haysanin, haddaba waxaan ku tallinayaa ama ku boorinnayaa qoreyaasha cusub in ay wax badan ka ogaadaan waxa ay wax ka qorayaan iyo in ay akhriyaan maqaalada laga diyaariyey cinwaanka ay rabaan.

Isbaddalka Qoraaga

Akhriste: Isbaddalka qoraaga waxaa kamid ah.

1: Labiska uu xiran jiray iyo kuwa uu xiranaayo marka uu hal buug qoro waxaa u dhaxeeya farqi aad u weyn, tusaalle, waxaa is baddal ku imaanaya dharka uu qaadanaayo.

2: Hab-dhaqanka qoraaga, waxaa kobcaya garaadka qoraaga, maxaa yeelay, marka aad wax daraasayso waxaa kuusoo baxaayo wax farobadan, haddaba qoraaga hab-dhaqankiisii hore iyo hadda wax badan ayey iska baddalayaan.

3: Hab u fikirka qoraaga, waxaad mar walbo danaynaysaa in aad wax ka qorto wax walbo oo aad aragto.

4: Saaxiibbadii hore wuu iska beddalayaa, laakiin, wuxuu la soconayaa saaxiibo ay isku xirfad yihiin.

5: Badanaa wuxuu ku mushquulsan yahay cilmi baaris iyo isbarbar dhig xogo farobadan.

6: Qoraagu wuxuu jeclaan doonaa dalxiis farobadan.

7: Isbeddalada qoraaga waxaa kamid ah, in uu ka qeyb galo bandhigyada goobaha waxbarashada iwm.

8: Nolosha qoraaga waxey ka beddal naan doontaa middii hore uu ku jiray.

F.G: Isbadal sida uu ku imaado waxey ku xiran tahay sida aad iska dhigto.

Talooyinka anfacayo qoraaga

Intii aan ka qeybgalayey bandhig buug iyo intii aan kor ka eeg eegayey buug kala duwan, si guud, mar mar waxaa iiga soo baxayey arrimo aniga si' aan u arko oo aan is lahaa, haddii aad qoraaga la wadaagto, armay gallaan oo aragtidiisa beddelaan. Arimahaas waa kuwaane, bal ila arka.

Saddex maalmood oo kala duwan ayaa waxa aan ka qeybgalay bandhigyo ay qoreyaal ku daahfurayeen buug.Mid kamid ah, qudbaddiisa ku sheegay in buugga, laba meelood meel, uu hal habeen ku qoray. Mid kalana, waxa uu isna qudbaddiisa ku sheegay, in uu buuggiisa oo 200 bog ku dhaw, uu ku qoray 7 maalmood oo keliya. Haddaba saddexdaas qoraa, si dadban iyo si toos ahba, waxey ku faanayeen in ay arintaasi tahay karti iyo dadaal dheeri ah oo ay layimaadeen.

Waxa ayna aad u rumaysan yihiin in wax waqti dheer la gelin aysan kasoo bixin wax faa'ido badan leh, sidaas darted, waxaan soo jeedin

lahaa, si kasta oo Alle kuugu fududeeya qoraalka, oo hibo gaar ah uu guugu siiyo in aad muddo yar buug kusoo saarto, sidaas ha u sheegine, waxa aad carrabowdaa in aad buugga muddo dheer kasoo shaqeynaysay, oo aad sannado badan dulfadhiday.

Adigu toddobaad ku qor ama bilk u qore, dadka u sheeg in aad sannado kusoo dhafraysay oo aad kusoo tiro iyo tacab beeshay.

Maalin kale, waxaan ka qeybgalay bandhig uu qoraa ku daahfurayey buug, waxa uu qoraagaas sheegeyey, in uu qoray saddex buug oo uusan weligi cidna uga baahan tafatir, oo uu keligii is ku filnaaday, haddaba middaas waa macquul gal, balse dad waxaa jira in qof keligii isku filnaan Karin, oo uu qofka howl kasta ugu baahan yahay garab, laakiin taladu waxey tahay, buugga aad qortay in dadka aysan kaa iibsanin, maadaamaa aad keligaa wax walbo isku koobtay……

Sidoo kale, waxaad u sheegtaa dadka, in buuggaan khubaro farabadan oo dalka yurub iyo

mareykan kala jooga ay soo eegeen, soona sixiixeen oo ay weliba qireen in uu yahay buugga sanadka.

Maalin kale, oo aan ka qeybgalay bandhig buug, ayaa qorihii waxa uu ku qudbeeyay in buuggiisa (oo buug cilmi ahaa) uu maskaxdiisa ka qoray oo aysan ku jirin wax yar oo uu meel kasoo xigtay. Aadna u amaanay buuggiisa, walliba durayey dadka buugta kale qoray, ee meelaha wax kasoo xigta, waa suuroobi kartaa in Alle maskaxdaas ku siiyey, dhageystayaasha qeyb kamid ah waa la dhici karaan, laakiin, dadka howlahaas ku faradheer Kama dhaadhici karo buug cilmi ah oo aan tijaabo cad ama tixraac salka ku haynin. Sidaas darteed, waxaan halkaasna kasoo jeedin lahaa, maskaxdaada kawada keen oo, laakiin dadka ha usheegin taas, waxaana habboon in aad u sheegto in aad u cuskatay buug farobadan oo aad soo akhrisay iyo intaas majalladood iyo maqaalo oo aad kusoo indho beeshay.

Midda kale, maskaxdaada ka keen oo, tixraac isaga same, oo tixraaca isaga soo qor buugt ay

isku wax ka hadlayaan, waliba soomaalida kuwooda iska daayoo,, isticmaal buugta carabiga iyo ingiriiska ku qoran oo aysan soomaalida aqoon.

Intii aan buugta ku dhex jiray, waxaan arkay labo buug oo qoreyaal inta ku qorteen magacyadooda, soo bandhigeen.

Waxaa kaloo aan arkay, buug intiisa badan hal meel laga soo qaaday oo isagana lasoo bandhigay, haddaba waxaan halkaas kasoo jeedinayaa, in qoruhu si xeeladaysan u shaqeeyo, haddii uusan deynaynin minguurinta.

Boqollaal meelood, Melba xoogaa kasoo qaato, ha isku soo duwo oo, magac ku habboonna ha ula baxo, tan laftayda hal-abuur iyo kaarto Kama marna.

Sideedaba, xikmaddu kuma xirna da'. Waxaa laga yaabaa, qof aad u da' yar in uu ka xikmad badan yahay qof daqoobay, taas waxa aad ka fahmi kartaaba taladii wiilka yarka ahaa (waa raage ugaas) uu odayaasha doqoobay kulahaa hadalkii

u ekaa: war cirrooleyaal ha u yeerine, cuqaal u yeera,

Laakiin dhaqanka taas aad uma aqoonsana" wiil yar inta uu geed ka booda ayuu talo ka boodaa," ayaa maanka dadka waaweyn ku qufulan.

Sidoo kale, waxaa jirta buug ay qoreen qoreyaal aad u da'yar oo Alle xikmad ku mannaystay, waxaa laga yaabaa in ay qaarkood 15 sano jiryihiin, aqoonta ku duugan marka aad qoraalkooda akhrinayso, waxa aad u malaynaysaa in dadka qoray ay yihiin dad waaweyn ama dad hore, laakiin, kolka aad eegto jaldiga dambe ee buugta, ayaa waxa aad ku arkaysaa sawirka qoraha iyo taariikhdiisaba.

Dhallinyarada cuslaatay iyo dadka waaweyn, kolka ay dhugtaanba, buugga waa tuurayaan, waxa ayna leeyihiin, maxaa uu ilmahaan nagu soo kordhinayaa?, xitaa dhallinta ay isku da'da yihiin buugta ay qoraan, madaneeyaan oo, waxa ay jecel yihiin buugta ay qoraan dadka ka waaweyn, sidaas darteed, waxaan halkaan kasoo

jeedin lahaa, qoreyaasha da'da yar in aysan buugga ku dhejin sawirkooda iyo taariikhdoodaba, si aysan u niyadjabin, suuqa ballaaranna u hellaan.

Qoreyaasha qaarkood, haddii ay rabaan ha weynaadaan waxey taariikhdooda ku muujiyaan halkii ay kusoo barbaareen, taas oo soomaalida cusub ay dhadhansan karto qabiilkiisa, waaxaana laga yaabaa in dadka ku kacsan qabiilka deegaankaas ay saamayn ku yeelato gadashada buugga, haddaba inta aan aniga goobjoogga usoo ahaa, labo qoraa ayey arrintaasi saamayn ku yeelatay gadashada buugtooda, labadaas qoraa, kolkaas buu buuggii si fiican u galay magaaladii uu ku gadmi waayey, maadaama, qabiilkii hadda maamulo loo samaystay, waxaan soo jeedin lahaa, in qoraagu uu iska dhaafo in buugga uu ku caddeeyo meesha uu ku dhashay.

Waxaa jira qoreyaal buugta ay qoreen wareejinaaya oo iyagu dadka inta u geegeeya, u sharraxa micnaha buuggu uu xambaarsan yahay,

u sheegga kalyantiga in uu isaga qoray, jeerkaasina ka codsada in ay ka iibsadaan, macaamiisha aad iyo aad bay uga yaabaan arrintaas, soomaalida qoraaga waxey ka aaminsan yihiin qof sare, qof wax wareejinaayana waxey u arkaan qof hoose,

Sidaas awgeed, amakaak bay la noqotaa in qoraha misena uu wareejiyo buuggiisa, markaasey inta wax kale u soo baxaan oo yasaan qoraagaas baa inta wax haysta gun baa u badane, waxba ka iibsan waayaan, qaar baaba inta liida ku jeejeesa, hadaba halkaan waxaan kasoo jeedin lahaa, qoruhu ha wareejiyo buuggiisa, laakiin marka uu dadka ka gadaayo, ha u sheego in uu buugga qoray qoraa sare, oo waliba soomaalidu qurbejoogta ayey ka dambeeyaane ha dhaho, qof waashintoon jooga oo bare ka ah jaamacadda Harvard ayaa qoray, waana hubaa oo, si degdeg ah baa lagu iibsanaayaa, lacagta haka dhurto, tan cid kale hala weydiin maayo, aniga ayaa kusoo caanamaalay, waagii aan garabku dukaanke ahaa.

Haddaba dulucda taladaan waxey ka turjumaysaa waaqiciga jira, marka waaxa lama huraan ah in aad mar walbo aadan u sheegin bulshada in aad adiga qortay buugga aad wado, balse aad u sheegto in uu qoray qof qurbejoog ah, sidaas darteed, akhriste, talooyinkaan waxaan kasoo minguuriyey qoraa Suldhaan Nayruus, oo ah qoraa in ka badan 20 sano, walliba soo saaray buug farobadan oo gaarayso 50 buug, haddaba waxaan ka baran karnaa talooyinkaas wax yaalo faro badan waxaana kamid ah.

1: Buug aad gacanta ku hayso ha u sheegin in aad adiga qortay.

2: Sawir ha ku dhejinin buugga.

3: Ha sheegin taariikh nooleedkaada.

4: Buug aad adiga qortay u sameyso suuq geyn.

5: Buugga marka aad qorayso u sameey tixraac.

6: Qorista buugga hal meel haka soo guurinin, balse, meelo farobadan kasoo qaado.

Caqabadaha qoraaga

Caqabadaha qoraaga haysto waa kuwo farobadan balse saddex ayaan kusoo koobayaa.

1: Inta uu ku fekeraayo in uu buug qoro. Fekerku waxa uu aad uga dhex guuxayaa dadyow farobadan, kuwaas oo damacsan in ay mar uun wax qoraan, balse waxaa middaas kuusuurta gellinaayo in aad samaysato jadwal.

2: Inta uu buugga qoraayo. Buug qorista waxey u baahan tahay waqti iyo soo jeed farobadan, waayo, wax aan waqti la gellin maba suurtoobaan, haddaba caqabadaha buug qorista waxaad kusoo afjari kartaa in aad leeday waqti wax qoris iyo waqti ku habboon.

3: Buugga marka uu dhammeeyo qoraaga. Waa caqabbadaha ugu dhibka badan, waa haddii aadan garab u haysanin ama naadi aadan ka tirsanayn, sababtoo ah, buugga marka aad dhammayso waxaa la iska rabaan dhowrkaan qodob.

NOQO QORAA

1: Tafatir 1.

2: Tafatirka 2.

3: Naqshadeynta buugga.

4: Qarashka daabacaadda.

5: Xayeysiinta buugga.

6: Soo bandhigidda buugga.

F.G: Qoraagu waxaa haysto caqabado farobadan, laakin, waa midka guulaysto mar walbo, ha quusan, hana niyadjabin jaalle.

Sida loo qoro sheeko gaaban

SHEEKADA GAABAN (Short story)
Waxaa maxay sheeko?
Waa qoraal ku dhisan aragtiyo iyo dareen, kaas oo loo diyaariyay qaab jaan go'an, akhristuhuna ka dhexlo shantaan qodob.
- Cabsi
-Farxad
- Qosol
- Tab
- Aragti
Sideedaba, sheekadu waa in ay lahaataa billaw, baaxad iyo gunaanad. Waana in ay sameeysaa macno buuxa iyo digniino dhaqan, siyaasad, dhaqaale ama bulsho.

Maxaa sheeko loo qoraa?
1) in akhristaha laga qosliyo
2) in laga xanaajiyo
3) in laga cabsiiyo
4) in la madadaaliyo iyo
5) in laga nixiyo.

Qeybaha sheekada.
Sheekadaa waxaa loo abla ableeyaa
ilaa iyo Shan qeybood:-
A) Fiction story-------Sheeko qiyaali ah
B) Non-fiction story-----Sheeko dhab ah
C) Adventure story-------sheeko qar iska tuur ah.
Waa sheeko dhimasho ama dhaawac daran ku soo gaban gabowda, waxa aad dib u tix raaci kartaa sheeko aan

Maalin dhoweyd ku qoray fool buuggayga oo aan cinwaan uga dhigay " waa ay i soo eegaysay!"
D) Romance story----- sheeko jacayl ah.
Sheekadaan galmo ayaa ku jirta.
E) Horor story-------- Sheeko cabsi ah.

Sheekada gaaban waxa ay leedahay tiirar ay dhisan tahay.Halkaan waxa aan idinkula wadaagayaa dhowr tiir oo inta badan Noofalka ama sheekada gaaban lafteeda lagu dhiso.Igana raalli noqda aqoon sidaa u durugsan uma sii lihiye.

Sheeko walba waxa ay ka kooban tahay siddeed tiir oo lagama maar maan ah, waa maxay tiirarkaas?
1) Sitting
2) Theme
3) Character
4) Narator
5) conflict
6) plot
7) Style and Point of view
8) Don't tell me, show me

1) Sitting:- waxaa uu ka jawaab celiyaa Halkee wax ka dheceen? Goormayse dheceen? Xaaladdu sidee bay ahayd markii ay wax dhacayeen? Iyo qaab-muuqaalka deegaanka sheekadu ka dheceyso uu leeyahay.

Tusaalle: - waa Muqdisho, sanadku waa 2020-ka, cirka ayaa roob shubaya, shimbiro ayaa samada heysta. Fiiri! Waxa aan sheegay goobta wax ka dhaceen oo waxaan iri " Waa Muqdisho" waxa aan sheegay goorta wax dheceen oo waa anigaa leh "

Sannadku waa 2020" jawiga guud ayaan sawiray oo waa anigaa iri "Cirka ayaa roob shubaya, shimbiro ayaa samada heysta" intaas ma ku dhacday? Ila soco marka. Waa ka sii qurxi kartaa adigu intaas waa tusaale uun. Sow ma fahmin? Hagaag.

Theme: waa mowduuca sheekada. Sheekadaadu ma colaad baa ay ka hadlaysaa, ma jacayl baa? Waxa uu sheega nuuca farriinta ah ee aad gudbinayso. Waana

Halka lagu gudbiyo farriinta ugu muhiimsan ee sheekadaadu dirayso. Waxaa la adeegsada jilayaashada marka aad gudbinayso farriinta.

Tusaalle farriin cabsi ah ayaan rabaa in aan ka dhigo Theme-kayga waxa aan ka hadalsiinayaa jilahayga ugu muhiimsan sheekada asagoo leh " Safarkii aan shalay galab soo billawnay ayaan weli ku jirnaa, darawalka waxaa lagu amray in uu gaariga joojiyo. Horteenna waxaa taagan niman tuugo oo qoryo ku hubeysan, laba qof oo meyd ah oo ay dileen ayaa waddada dhiniceeda yaal" waa

theme cabsi ah sow uma jeeddid?

3) Character: (jilaa) waxa uu ka jawaabaa yaa sameeyay waxa dhacay? jiluhu waxa uu noqon karaa qof, xayawaan ama shey kale. Kolkaa qoraaga waxaa laga doonayaa in uu dabeecado u sameeyo jilayaasha sheekada. Sifooyinka uu sameynaayana waa in ay is keenaan ficillada uu sameynaayo jiluhu. Jilayaashu waa in ay kala duwnaadaan. Oo sidee baa sifooyin loogu sameeyaa jilaha? Marka hore akhristaha u sawirka qaab muuqaalka jilaaga.

Tus: waa xoog wayne. Indhihiisu aad baa ay u cad cadyihiin. Funaanad madoow oo ku dheggan, murqihiisa gacmahana soo saaraysa baa uu xiran yahay. Xabad wayn baa oo aad u kala baxsan baa uu leeyahay. Feeryahankii M. A. Kalaay baa la moodaa. Ilkaha kore midbaa kala jaban.Adduunyada Ilaahay waxa uu ugu jecelyahay dagaalka. Maalinkii afar mar ayaa uu dagaal galaa. Waa kibirraane dulmi badan.Ar ma fahamtay? Qaabkaas baa loo sawiraa.

● Nuucyada jilaha(types of Character)
Si guud jilayaasha waxaa loo kala qeybiyaa labo: jile maldahan iyo jile toos ah. Jilaha maldahan: qoraagu sheekada uma sheego akhristaha ee waxa uu ka hadalsiiyaa isla jilaha. Jilaha tooska ah, qoraaga ayaa dhammaan xogta siiya akhristaha.Waana nuuc caajis ah.

Si gaar ah jilayaasha waxaa loo kala saaraa
A) Static: waa jilaha aan wax is bedel ah sameyn billawga ilaa dhammaadka sheekada oo hal dabeecad oo aan is beddelin ku jila sheekada.

B) Dynamic: waa jilaha is beddela oo dabeecado kale iyo sifooyin cusub yeesha sheekada gudeheeda. Inta badan Kan baa la adeegsadaa.
C) Round character: waa jile leh dhowr dabeecadood oo kala ged geddisan iskana hor imaanaya. Jilahaan dad badan ayaa ay isku dhacaan, waana qiyaamo badan yahay.
D) Stock character: waa jile aanba waqti hayn mar kastana mashquul uu dhexda uga jira. Inta badanna

lama adeegsado sheekada.

E) Protagonist (main character) Waa jile wanaagsan ee dhanka fiican uun wax ka eega. Jilahaan dhib adduun iyo duruufo ayaa uu wajahaa.Si kale aan u dhigo, waa atooraha ama xiddigga sheekada.
F) Antagonist: waa jile aan jid iyo jiho lahayn wax kastana oo atooruhu sameynaya caqabad ku ah. Waxaa ay isku dhacaan Kan kore. Waxa uu nolosha adayg uga dhigaa main character-ka.Waxa uu sheekada uga jiraa booska laadirku filamka uga jiro.

D) Contogonist: waa jilaha soo baxa marka ay is qabtaan protagonist iyo Antagonist, ee la dilo ama uu dhinto antagonist, waxa uuna dhaliyaa is faham darro iyo isku dhac ka daran kii hore. Marka ay isku dhacaan labada jile ee ku kala jira (F) iyo (E) waxaa sheekada ka dhex abuurmaya isku dhac(Conflict)

Isku dhaco marba marka ka dambeysa waa in uu

hawada sii galaa si sheekadu xiiso u yeelato. Isku dhaco waa in uu ka yimaad dhanka jilaha jid iyo jiho diidka ah.Gunaanadka waa in xoogaa la soo qaboojiyaa isku dhicii, marba marka ka dambaysa waa in uu isi soo dhowaansho jiraa ugu dambaynna waa in la xalliyaa isku dhaca. Narator(tebiye) tebiyuhu waxa uu akhristaha u soo tebiyaa sheekada, hadde ogoow qoraaga ma ahan! Narator-ka iyo character-kaba waxaa abuura qoraaga.Mararka qaar waxaa ay noqon karaan isku mid. Mararka qaarna waa ay kala duwnaan karaan.

Ciyaaraha marka la daawanaayo waxaa jira wariye soo tebiya ciyaarta. Laakiin waxa aan ognahay in ay jiraan maammul soo abaabulay in ciyaartu dhacdo, haddii maammulku tebiyaan ciyaarta nah yeelan mayso-- waa iyadoo madaxwaynaha Fiifa soo tebiyo ciyaar ka dhacaysa Kaamnuu-- marka intii uu tebin lahaa waxaa loo sameeya saxafiyaal tebiya. Sidaa darteed tebiyuhu waxa uu ka sheekeeya billawga ilaa dhammaadka sheekada.

Plot: waa aalad ka shaqaysa sidii sheekadu iskugu

xirnaan lahayd billaw ilaa dhammaad. Waa tiir ilaalinaya isku tixnaashaha sheekada.

Conflict: waa soo sheegnay sheekadu haddii aannay lahayn isku dhac wax nah ah ma lahan. Waxaa hoos yimaad wax la yiraahdo “Dailoge" ogoow buugaag badan ayaa laga qoray dialog-ga. Sideedaba waa in uu isku dhac noqdaa dagaal, oo uusan noqon sheeko iska caadi ah.

Tusaale: Ali iyo Cumar baa sheekaysanaaya
Ali: Maxaad gafuurkaaga la taagaysaa maanta?
Cumar: Dib iiga deg lafahaaga ha ku qamaarine.
--- Ma adigoo sidaan u yaal baa i leh lafahaaga ha ku qamaarin?
---- Malaggaagi baa halkaan ku keenay baan u malaynayaa? Ma fahamtay?
Style: waa ereyada uu qoruhu u dooraayo sheekada. Ma af-suuq buu ku qorayaa?Ma ereyo gobol gooni ah laga yaqaan buu ku qoraya?Ma ereyo carruurta loogu tala galay buuu ku qorayaa?Mise kuwo dadka waawayn fahmi karaan?Istaaylku waa nuucaas. Waxaa soo raaca

“Point of view" kan qoraaga ayaa uu qoseeyaa. Waxaa lagu qoraa dhammaadka ama billawga sheekada.Waxaana lagu soo loobaa muhiimadda ay sheekadu leedahay iyo waxa ay taabanayso.

Don't tell me, show me: ha ii sheegin ii sawir. Sideedaba akhristaha looma sheekeeyo ee waa loo sawiraa wax kasta. Waxaad tiri “Caasho waa doqon) akhristuhu kaama aqbalaayo warkaas. Caasho ka muuji astaamaha doqon nimida oo dheh "ma oga wax kasta oo hareeraheeda ka dhacaaya, ma dareen badana oo

Waa dhug la'dahay, had iyo jeer waa ay iska maahsan tahay" akhristuhu waxa uu fahmayaa in caasho doqon tahay laakiin adigu ha u sheegin.

Intaas ayaan ka aqaan qaabka loo qoro sheekada gaaban, Noofalkuna wax sidaa ah ugama duwna keliya waa uu ka dhirir badan yahay. Ugu dambayn qoraagu waa in akhristaha dareen wax ku tusaa. Shantiisa dareeme waa in uu ku dhex adeegsadaa qoraalkiisa.

Naaskeeda bidix buu salaaxayaa!" Yaa! War maxaan iri? Akhrisaha dareenka salaaxista ayaa durba u sawirmaya. Haddii aad dooneyso in aad qoraalkaaga ama sheekadaada ku dhex muujiso dareenka codka, adeegso ereyada ficilka ah ee codka sheega

tusaalle: "cod guux leh baa hawada ku jira"

Dhadhanka isaga waxaa inta badan la adeegsadaa saddex waana (Qaraar, dhanaan, macaan)

Tus: waxa uu u qaraaryahay sida sibidhka. Waxa uu u macaan yahay sida malabka.iwm. Qaabkaas baa loo adeegsadaa dareemayaasha. Hambalyo haddii aad akhrisatay cashirkaan.Waxa aan kugula tallinayaa in aad akhriso sheekooyinka iyo buugaagta quseeya arrimahaan, wax aan hubaa in aad ka soo dhallaali doonto idam Alle.

Shuruudha Qoraaga

Qoraaga waxaa loo shardhiyaa in uu diin leeyahay ama aqoon buuxda u leeyahay diinta islaamka, laakiin, haddii kale waxaa dhacaysa sheekadaan oo kale, bal ila eega.

QALIN MAALKII GOOYAY NAFAHOOGA!

Dharaaruhu wacdarooyin iyo bandhigyo cajiib ayaa ay qof noloshiis ku reebaan maalin walba. Qorraxdu haddii ay dhacdo nin baa ay murug kala hoyaaddaa, haddii ay soo baxdona mid kale ayaa ay walbahaar iyo isku buuq ula soo baxdaa. Noloshaaba sidaas iska ah.

Qoraagu, waa qof si fudud uga bixi kara diintiisii--waa haddii uusan aad ugu dhegganayn---waayo? Taxliilinta iyo hal abuurka badan ee uu maalin walba samaynaayo ayaa marka dambe halis u keenaya. Caqligiisa ayaa maalinba tan ka dambaysa cirka iska sii shareeraya, taasoo keenta in uu su'aalo

badan iska waydiiyo dabeecadda iyo diimaha, haddii uu heli waayo jawaabo qanciya, mulxid bilaa diin ah baa uu noqdaa, ama mid kale ayaa uu ku biiraa.

Qoreyaasha badankood subax walba wax cusub baa ay ku fikiraan, taas oo keenta in ay aakhirkana is diloow ku fikiraan. Walaahoowga iyo taaha dega quluubta aadanuhu, dad badan baa ay geeri u gacma qabteen, kuwo badan baa ay inta laabta ka degeen qolal kiiba dhowr mitir yahay ka samaysteen, kolkaas baa ay isla hadal iyo walbahaar ku dhammaysteen nolosha. Sideedaba qoraagu waxa uu saaxiib la yahay walbahaarka, waxa uu jeebka ku wataa boorso sabool nimo ku suntantahay; mid kale oo taajir nimo u tilmaamaysana laabta ayaa ay ugu jirtaa; haddana waxa uu iska dhigaa nin mashquul badan, shaqooyin badan oo howlo adduun ku furan yihiin. Oraahda ugu wayn ee aad qoraa kasta ugu tegayso waxa weeye " I am bussy at this time, call me back" " Mashquul baan ahay hadda, mar kale i soo wac"

qoraagu inta uu da'yaryahay aad buu u fikiraa, xogo badan oo aan tiro lahayn ayaa uu aruuriyaa, kolkii uu kontonka sano gaadhana dhasaasaq baa uu noqda kolkaas baa inta xogihii iskaga milmaan buu hadba mid ku aan dhammays tirnayn oo dabada ka go'an ku farraqaa dadka.

aan gudaha u soo galo gunta maqaalkayga e, qoreyaashii dunida ugu waynaa waa ay is dileen? Yaah?..is dileen aa? Haa..waa run!

•John Kenneddy, waxa uu ahaa sheeko-yahan reer Maraykan ah, muddo ayaa uu qorayay buuggiisa CONFEDERECY OF DUNCES; ha yeeshee, dhowr madbacadood ayaa diiday in ay u daabacaan buuggiisa, ka gadaal markii ay akhriyeen. Mar kasta oo uu wax ka soo beddelo, waa uu u gayn jiray, laakiin si isku mid ayaa ay u diidi jireen, niyad jab ayaa ku dhacay, isaga oo gaarigiisa ku jira miraayadununa u dallacan yihiin ayaa uu shidaal gadaal ugu jiray gaariga gudaha uga belbelay, ka dibna, kibriid baa uu baf ku siiyay, dhuxul ayaa uuna isku rogay daqiiqado ka dib, laakiin waxaa

yaab leh, buuggiisii 10-ka jeer laga diiday waa la daabacay, billado cajiib ah ayaa uuna ku guulaystay.

• Lares Scope, waxa uu ahaa qoraa reer Gaana ah, buug uu cimrigiisa barkiis qorayay oo la yiraado " The White Mountain" Buurta cad ayaa isaga oo aan weli la daabicin PDF-kiisa la helay, deedna inta gurigiisa hoos ka xirtay ayaa uu is marjiyay.

• Hunter S Tompson, waxa uu ahaa qoraa reer Maraykan ah, dhowr buug oo cajiib ah ayaa uu qoray, isku buuq iyo walbahaar ayaa soo wajahi jiray mar kastoo la gaaro bisha Agoosto, waa galab, shantii ayaa ay saacaddu widiidiqaysaa, bannaanka carruurtiisa ayaa ku ciyaaraya, waxaa uu qolka oo albaabkiisu buluug yahay, warqado iyo buugaag badanna ag safan yihiin ayaa uu la galay baskoolad, deedna inta afkiisa geliyay afkii baskooladda ayaa uu riishada farta saaray.

Isagoo sidaa u haya ayaa uu daldalan billabay. Waa la xasuustaa oraahyadiisii ugu dambeeyay oo ahaa " Maya ciyaar badan, maya qosol badan, maya kaftan

badan, waa ka dhammaanaya middaan wareerka badan, waa baxayaa!" Deedna inta riishaddii gadaal u jiiday ayaa uu sidii biyihii xabbad u laqay, kolkaas baa ay madaxa qeybta dambe ka baxday.

Steph Chichrito, waa qoraa u dhashay Hayti, 1822-kii ayaa uu qoray buug la yiraahdo " The day i was born" maalinkaan dhashay! CHichrito markii uu buuggaas qoray ka dib, habeen gurigiisa kuma hoyan, ciddiisii iyo eheladiisii ayaa uu u sheegay in uu safar dhowr sano ah gelaayo, deedna inta buste wayn qaatay ayaa dhex fariistay goob qashin qub ah oo laysugu geeyay qashinkii magaalada, sida tan jasiira oo kale, galbeedkana ka ahayd magaalada Papeete oo ah caasimadda waddankaas, toddoba maalin markii uu halkaas joogay, waxna uusan cunin ayaa Eey soo ag seexday, kolkaas baa uu gaajo awgeed inta ay qabtay baa uu qaniinyo dhegta dhab ugu siiyay.

Eeygii muddo haddii uu kolba dhinac u boodayay, welina uu iska fujin la'yahay buu isna cajarka ilko shooko ah ka dhex bixiyay, hawadaas baa uu ku

dhegay eeygii oo ka lulanaya. Goor dambe ayaa uu ka fuqay, kolkaas buu inta ka soo horjeestay ku yiri " Eeyahow dunida adiga ayaa aan kaaga tegayaa, waxa aad iga qastay baahidii, jiifkii iyo welwelkii halkaan i keenay, doqon aan bini aadam nimada wax ka aqoon baad tahay ee nagu kala wad" deedna inta mindi kala soo baxay bac madoow uu watay ayaa uu caloosha shab iska siiyay oo ku wareejiyay, wax yar ka dibna uustii baa bannaanka soo baxday.

Qoraagii reer Ingiriis ee Tomb Snake, laftigiisu waxa uu ka mid yahay qalin maalkii gooyay naftooda, isaga oo qoraya buugga "The Black Tiger" ayaa uu laabtoobkii ka damay isaga oo aan save garaysan xogta, deedna baskoolad agtiisa taallay ayaa uu sujuudda iska saaray isaga oo leh " Waaba nacay laabtoobkaan, xabbad baan kala daalayaa" laabtoobka uu xabadda kala daalayo waa wajigiisa, deedna saddex baa uu foolka iskaga toogtay.

Gunaanadkii, sideedaba dadka hal abuurka ah waalli u dhimman ma jirto, mirir kasta oo noloshooda ka mid ah waa ay fikiraan, qaarkood

haddii aad la kulanto waxa aad arkaysaa iyaga oo hal meel indhaha ku taagaya, qaarkoodna hadallada ay kuu sheegayaan baa aad ka garan kartaa in ay hadda sameeyeen. Sheekadooda lagama caajiso been ba ha u badnaatee, waana wada af tahamiin.

Qoraa walba waxa uu leeyahay balwad u gaar ah iyo hab nololeed uu isagu ka helo, qaar baa sigaarka iyo jaadka cuna, kuwaa qamriga caba, kuwo kale ayaa kafaayga ku waalan, halka qaarna ay muusigga aad u dhegaystaan. Ma jiro qoraa aan waalnayn laakiin waxaa lays dheeryahay xaddiga waallida, qaarbaa boqolkiiba toban ah halka kuwo kalena ay yihiin sagaashan boqolkiiba.

Soomaaliya, inta qoraa ee is dilka ku dhow Alle ayaa og oo anigu war uma haayo, laakiin waxa aan ogahay in badan oo ka mid ah in ay ku sugan yihiin xaalad halis ah. Waayo?

Dabaacadda buugga iyo qarashaadka badan ee jeebkooda ah, qiimaha qoraagu halkaan ka leeyahay

oo aad u hooseeya, dowlad qoraaga taageerta oo aan jirin, dadka wax akhriya oo aad iyo u yar iyo olole akhriseed oo jirin, bandhiggii buugaagta oo laga hor mariyay kii akhriska, shirkadihii daabacaadda oo iyagu aan taageero badan siin qoraaga iyo fan la'aan jirta ayaana sabab u noqon doonta in qalin maal badan joojiyaan dhigaalkooda ama ay iyaga laftoodu halis ku galaan fikirka badan.

Dowladdu waa in ay taageertaa qoraaga iyo qof kastoo hal abuur ah; maaddaamma, ay yihiin dadkii bulshada dhisayay, waa in la helaa qoondo loogu tala galay qoraaga; haddii aan wax kale loo qabanaynna waa in ay jirtaa madbacad qaranku leeyahay oo taageerta qalinka qoraaga Soomaaliyeed si bahda hal abuurku ugu wel wel la' aadaan arrinkaas, haddii kale walbaahrku god buu ku ogaan doonaa halyeeyo badan oo aan tirsanayno maanta.

Maxaa wax loo qoraa?

- In xog la gudbiyo
- In cilmi laga barto
- In wax lagu dhiirrigeliyo
- In lacag laga sameeyo iyo
- in leysku madadaaliyo
- In magac lagu helo.
- In la weheshada qoraalka.
- In lagu cabbiro aragtiyada uu qofka aaminsan yahay, taas oo suurta gelinayso in uu bixiyo fikirkiisa.
- In uu sheeko waxa uu qofka damacsan yahay mustaqbalka.
- In uu qofka ka sheekeeyo safaradii uu galay noloshiisa.

- In uu kaga nafiso cabudhinta ayuu wax u qoraa.
- In wax loo qoro taageerid shaqsiyadeed.

F.G:

Qoraagu waxaa lagu tiriyaa mar walbo in uu yahay qeyb kamid ah bahda warbaahinta, maxaa yeelay, qof walbo meela ayuu ku fiican yahay, qof waa farsamo yaqaan, qofna waa curiye.

Sida loo qoro maqaal

Ugu horreyn waa in aad heshaa mowduuc soo jiidasho leh, oo qofku shaqo walba oo uu hayay joojinaayo. Tusaale ahaan: Waa ay isoo eegaysay! Wixii aan maanta arkay! Saa waxay tiri! Sideedaba mowduucu waxa uu noqon kara: weydiin (Muxuu jacaylku ugu dhacaa saboolka?) ama la yaab (Heyga jeesan!) amaba in aan sheyga/Qofka magaciisa sheegto (Maana-faay) hadda waxa aad heysataa mowduucii aad wax ka qori lahayd.

- **Hordhac**

- Hordhaca waxaa si kooban loogu faah faahiya maqaalkaaga, laakin ka fogoow: in aad ereyo soo celceliso, ha soo hadal qaadin mowduuca mar labaad, hor dhacaaga ku qor oraahyo soo jiidasho leh oo maqaalkaaga la xiriira iyo murti aad u caajib, una qor qaab farshaxamaysan oo akhristuhu uusan ku nacayn Maqaalka soona koob, waayo? Dadku ma jecla hordhac dheer.

- **Baaxad (Body)**

- Baaxaddu waxaa ay si faah faahsan u tilmaantaa ujeeddada maqaalka, waana halka lagu qoro xogta ugu muhiimsan iyo fikradda guud ee maqaalka, halkaan qoraagu waa in uu la yimaado tusaale yaal badan iyo caddaymo aan yarayn, waana in ay aad xiriir ula leeyihiin mowduuca, si' maqaalkaagu iskugu xiriirsanaado.

- **Gunaanad(Conclusion)**

- Sida ereyga koreba kaaga muuqata, halkaan qoraagu waxa uu ku soo af-meerayaa maqaalka, waxaa uu dib u sheegayaa u jeeddadiisa, isaga oo adeegsanaya ereyo iyo weero ka duwan kuwii hore, waxaana uu si fiican akhristaha uga dhaadhicinaya macnaha guud ee maqaalku leeyahay, si aad u wanaagsanna waa uu u soo gaban gabeeynayaa, waxaana aad u muhiim ah in akhristuhu uu ka dhergo maqaalka.

Gunaanad

- Haddii aad buug/maqaal ku howllantahay, ka fogoow in aad qoraalkaaga soo cel celiso hal eray ama hal magac. Magaca beddelkiisa waxaa la adeegsadaa magac u yaal, sida: Isaga, iyaga, iyada iwm.

- Ka fogoow in aad isticmaasho hal xiriiriye

- Ku dadaal in aad afka Soomliga si wacan u barato.

- Mar kasta waynay xarafka ugu horreeya ee magaca gaarka ah iyo kan joogsiga ku xiga sidoo kale magacyada Alle iyagana waynay xarafka u horreya. Tus: Qur'aan,

Dhowr mar akhri inta aadan qof la wadaagin buugga aad qortay ama qori doonto.

- Marka hore A4 ku daabac oo adigu sax, weliba tiro 5 jeer ah qalin guduudan ku calaamay.

- Qoraalkaaga si fiican u billaaw, si fiicanna u soo gunaanad.

- Qalinleydu waxaa ay ku tartamaan sidii ay akhristayaasha u soo jiidan lahaayeen ogoow!
- Si fiican isugu xiriiri weeraha.
- Naxwaha si fiican u baro
- Maqaallo gaagaaban ku billow qoraalka, adigoo astaamihiisa si fiican ugu dhigaya.
- Af walba waxa uu leeyahay qaab dhihis iyo qaab dhigaaleed.
- Qaab dhigaaleedka adeegso qurubyadaan, ogowna in qurubka yahay curiyeyaal aan lahayn macno gaar ah kolka ay kaligood yihiin, waxaan ka mid ah:
- Waxa ay, waxa uu, kolkaas baa uu, ma' (Ma cunaayo) miyaa (Ducaale miyaa tegay?) baa iyo ayaa, kuwaas adeegso, waxaa laguu diidayaa in aad tiraahdo: waxay, wuxuu, ayuu, ayaan (ayaa aan) iwm. Midda kale dhawaqa ereyga aad iskaga ilaali, Haween (Habeen) leheen (leheyn) iwm. ugu dambayntii, Hambalyo, waxa aad tahay qoraa buuxa!

Astaamaha Qoraaga

1. NIDAAMINTA:

In maalin walba uu fariisto waqtiga uu cayimay, iskuna dayo in uu wax qoro, xitaa haddii uu marka hore awoodi waayo, laakiin waa khasab in uu bixiyaa dadaal dheeri ah. Waxa uu hadhow arkayaa in arrinkaasi aad uga caawinayo qoraalka iyo wax soo saarka tayada leh.

2. : Dhabbar adeeg.

Marka qoraagu bilaabo curinta sheeko ama qorista maqaal, waa in uu wadaa ilaa dhammaad ,

3- Ku xeel dheer qoraalka luuqadda

Waa in uusan qoraagu ku ekaan, aqoonta guud ee uu ka haysto luuqada uu wax ku qorayo.

4. Waayo aragnimada nolosha

Waxaa wax-tar leh, in aad qorto waxa aad garanayso iyo waxa aad soo martay nolosha.

: 5 Aragti qoto dheer.

Qoraagu waa in uu ka war hayaa arrimaha iyo dhacdooyinka ku hareeraysan.

6. Aragti u gaar ah qoraaga

Qoraagu si uu u bidhaamiyo micnaha daahsoon oo uu qani uga dhigo sheekooyinkiisa, waa in uu aragtidiisa gaarka ah ku daraa.

Laakiin sidee buu qoraagu ugu dari karaa aragtidiisa sheeko?

Inta aan su'aashaas ka jawaabin aan barano, maxaa laga wadaa aragti?

]Aragtidu waa qiimaynta ama fikrada shakhsiyadeed ee laga dhiibto shay .

7. Akhriska

Marka qofku akhriyo buugta, oo uu ka dhammaado akhriskeeda, waxa uu ku celiyaa meesha ay taallay.

Qoraaguna waa in uu si joogto ah u akhriyo buug kala gadisan.

8. Mala awaalka

Waxa uu mala-awaalku ka caawiyaa qoraaga, siinta sheekada qaabab kala gedisan oo cusub, waayo badan inta sheeko maskax ka dhalatay, jilayaasheeduna noqdeen dad dhab ah, oo ku dhex nool dadka, waxaanna jira qisooyin la isku labay dhabta iyo khayaaliga.

Ku biiridda Naadi

Akhriste: Naadi in lagu biiro waxey leedahay faa'ido farobadan waxaanna kamid ah.

1: Helidda casuumaad, sababtoo ah, waxaad xaq u yeelanaysaa in aad ka qeyb gashid safarada lagu casuumay naadiga.

2: Waxaad ku baranaysaa qoreyaal rug cadaayaal, kuwa dhexe, iyo kuwa cusub.

3: Waxaad helaysaa tababbaro heer caalami oo ku saabsan hab-qoraal.

Muhiimadda ay leedahay in lagu biiro naadi lama soo koobi karo, balse midda ugu weyn waxey tahay magac iyo buuggaada cusub in laguu suuq geeyo.

F.G= Naadi in aad ku biirto waxey sharaf u tahay hal abuurkaada.

Wax curinta waa imisa?

8 daan xaaladood keliya ayey allifaadu noqotaa; waa sida uu ku sheegay (Dr. Daariq Maxamad Al-suwaydaan) buuggiisa (Fanka Alifaada – فنالتأليف).

1. Shay aan lagaaga horayn.

Allifaada hal-abuurida: waa in aad dadka uga hor marto arrin aysan garanayn.

2. Shay dhiman oo aad dhamays tirayso.

Allifaada dhameystirka: waanna in aad hesho mowduuc aan xaqiisa dhabta ah la siin.

3. Shay qufullan oo aad sharaxayso.

Allifaadda faah-faahinta: waa in aad aragto mowduuc humaag ka buuxo.

4. Shay qaldan oo aad saxayso.

Allifaada sixidda: waanna in aad aragto ra'yi khaldan, dabadeed aad saxdo.

5. Shay dheer oo aad gaabinayso (Khulaasayn).

Waana inaad koobto mowduuc dheer, adiga oo aan ku xad-gudbayn micnaha guud.

6. Shay kala yaacsan oo aad aruurinayso.

Mowduuc kala yaacsan oo laga helayo caloosha buuggaag kale.

7. Shay isku yaacsan oo aad habaysay.

Mowduuc la isku walaaqay oo aad sintay, dabadeed hagaajisay.

8. Shay micne daahsoon.

Waxaad ku dhex aragtay mowduuc boos ay ku jirto sheeko, xikmad, arrin ama qodob.

Digtoorku waxa uu yiri “Ruux kasta oo 8 daa qof kamid ah, waxa uu leeyahay hibo aan la inkiri karin.

Akhriste: Wax curinta waa wax yaalaha ugu cajiibsan, haddaba wax curinta waa labo qeybood marka aan ka eegno dadka uu Allah hibada siiyey.

1: Qof Dhaxal u leh wax curinta.

2: Qof fikiro, intaas kadib ay usuurta gasho wax curinta.

Wax curinta waxaa buug ka qoray qoreyaal farobadan, balse buugga ugu caansan wax curinta uu qoray Dr Ibraahin Al-fiqi, (Cilmiga wax curinta iyo korinta nafta) Dr Ibrahin, wuxuu ahaa curiya ku xeel-dheer wax curinta.

Ugu dambeyn: Wax curinta waxaa weeya hadalkii oo suugaan lagu dhax-daray, oo micno loo yeelay, tusaalle, Xannaaneey xaajiyaddii mustaqbalkeygaay, xuurul ceyn la mooday, xiskaan kugu haayaa, xaramkaan ku keynayaayee.kkkkkkkkk

F.G: Wax isku day.

Inta aad buug qoristiisa billaabin

Fikir buug hel

Buug qoris waxaa ka horraysa fikir ama mowduuc helid.Haddaba raadi mowduuc soo jiidasho leh.

- Eebbe talo saarso

Ilaahay tala saarso oo kalsooni buuxda ku qab in uusan marnnaba ku cidlayn doonin.

- Naftaada ku kalsoonow

Ku kalsoonow in mowduucaan iyo buuggan qoristiisu ku sugayso.

- Diyaarso ilaha

Si waqti kuugu dhowrmo, tusmada buuggana ay kuugu hagaagto, soo aruuri xogaha .

- Marka ay waajib kugu tahay, haka mashquulin

Waajibku waa wax aadan ka baaqan Karin.

- Wax kasta u hur

Waqti, raaxo iyo wax kasta oo kaa hor istaagi kara xaqiijinta yoolkan .

- Dhakhso wax u qor

Ha ku hakan ereyada aad qaladday, waqti ha ku lumin qoraalka aan quruxda badnayn.

- Cidna ha u sheegin in aad buug qorayso

Waxaa laga yaabaa marka aad sheegto in aad qorayso buug, in ay ehelkaaga kaa mashquuliyaan,

- Markaad caajistaba yoolka xasuuso

Waraaq ku qor yoolkan oo far waa wayn ku soo saar.

- Ha isku daalin, heer waalli ah

Wax kasta awood adkaysi ayay leeyihiin, awooddaasina xuduud ayay leedahay. dabcan adiguna saas ha ka yeelin, haddayba tahay in uu adiga ku wax yeelaynayo ,haba qorin baa dhaanta. Ee inta u kaadiso jadwal u samayso xilliyada aad qoreyso.

Ugu dambeyn: Qorista buugga waxaa tiir u ah akhriska iyo cilmi baarisa, sababtoo ah, qofkii wax akhriya ayaa ogaada waxa uu qoraayo, sidoo kale, waxaa lagu maah-maahaa, qof walbo inta uu akhristo ayuu qoraa.

F.G: Akhristaha maanta waa qoraaga barri.

Noqo qoraa anfaca bulshadiisa iyo wadankiisa.

Eray bixinta afafka qalaad

Akhriste: Waxaa dabbar go'aya luqadda Soomaaliga, waxaana arrintaas xaqiijinaya erayada cusub ee nagu soo kordhaya maalin walbo, haddaba, waxaa muhiim ah, in loo istaago eray bixinta erayada qalaad, sidoo kale, waxaa laga rabaa wasaaradda ay quseeyso nooleyta Afka Soomaaliga, gaar ahaan, wasaaradda waxbarashada iyo Akadamiyadda cilmiga fanka iyo suugaanta, sidaas darteed, waxaa ceeb ah in maanta uu dabbar go'aya jiritaanka luuqadda Soomaaliga,

Waxaa kaallintaas dusha kaga ridayaa wasaaradda waxbarashada iyo Akadamiyadda qaranka, walliba, waxaa ayaan darro ah, in Akadamiyadda cilmiga fanka iyo suugaanta aysan u shaqeynin sida la rabay,

Hagaag: Waxaan tallo ahaan usoo jeedin lahaa in uu qof walbo waxa uu bartay uu ka sameeyo eray bixin, tusaalle, qofkii bartay siyaasad ha sameeya eray bixin, qofkii bartay cilmiga beeraha ha sameeyo eray bixin ku saabsan beeraha.

F.G: Eray bixinta marka la suubinaaya waxey u baahantahay in la helo qubbaro ku xeel-dheer cilmigaas la turjumaayo, haddaba waxey ku fududahay in loo sameeyo Aqoonyahannada bartay siyaasadda urur mideeya, sidoo kale, aqoonyahannada bartay beeraha.

Ugu dambeyn: Cilmiga beeraha waa cilmiga keliya aan helli karno eray bixintiisa, haddaba waxaan ku boorin lahaa ardayda bartay cilmigaas in ay u hiiliyaan luqaddooda.

Dhammaad

Akhriste: waxaan rajeyn doonaa buuggaan in uu noqdo mid lagu intifaaco, waxaanna buuggaan la dhameeyay taariikhda marka ay aheyd 26/10/2019, maallin Talaado ah, Waxaanna meesha kamar neyn salliga nabiga scw, salaamta aalka, asxaabta saalixiinta, iyo awliyada.

Wabillaahi towfiiq.

Qoraaga buugga wax soo saarkiisa waxaa kamid ah

Buugga ugu horeeyay uu qoraaga soo saaro waxaa lagu magacaabaa.

1: Kasbasho jaceyl, Buuggaan waa buug ka hadlaayo hababka loogu abuura gabadha dareen jaceyl, haddaba akhriste, buuggaan wuxuu ku barayaa waqtiyada lala tacaali karo jaceyl, ogsoonow, waqti walbo jaceyl lama abuuri karo,

Ugu dambayn, mucaashiqiinta la tacaalaya jaceylka Allah ha iin fudadeeya, aamiin.

2: Wareysiga shaqada.

3: Taariikhda federaalka soomaaliya.

4: Caawiyaha Caruusyada.

5: Noqo Qoraa.

Iyo buuugga ugu dambeeya oo hawada kusoo jira waxaa lagu magacaabaa) Shaqa Doon

Sidoo kale, waxaa jira maqaalo uu qoray qoraaga waxaana kamid ah.

1: Dhiigya cabyada soomaalida.

2: Maqaar muqdisha jooga vs maskax UK joogta.

3: Dadka waalan inta ay u qeyb samaan iyo inta dunida ku nool.

4: Beeraha Soomaalida.

Akhriste Qoraaga waxa uu soo saaray waa badan yihiin…….

Tixraac

Waxaan kasoo xigtay dad qubaro ku ah qorista buugaagta, waxaanna kamid ah dadkaas.

1: Jaalle Jamaal, waa hal abuure ama waa curiye , wuxuuna aad ugu xeel dheer yahay, in uu sameeyo eray bixinta afafka qalaad.

2: Abwaan Yaxye Sigane, waa qoraa kuna xeel dheer arimaha qoraalka.

3: Abwaan ciyaaye, waa Abwaan ku xeel dheer suugaanta.

4: Abwaan C/salaam ceeryaamo.

5: Buugga Qoraa kaab.

6: Buugga Akhriska iyo Qoraalka.

7: Qoraa Yuunis Cumar.

8: Qoraa Suldhaan Nayruus.

9: Buugga Ibrahim Al fiqhi